# Victim Impact Statement Factsheet

Bayaanka Saamaynta Dhibanaha waxaa weeye bayaan qoraal ah oo ka socda dhibnaha, hay'ada, ama ganacsiga oo sharaxa waxyeela jidheed, cilmi nafsi, dareen, iyo dhaqaale ee ay la kulmeen oo ka timid danbiga wakhtiga xukunka. Maxkamadu waa inay eegto bayaanka saamaynta dhibnaha iyo sidoo kale bayaanada dacwad oogaha iyo eedeysanaha marka la eegayo xukunka eedeysanaha.

**Bayaanada Saamaynta Dhibanaha ee Xuquuqda Dhibanaha!**

Gobolka Washington, bayaanada saamaynta dhibanaha waxaa lagu sharaxaa Crime Victim Bill of Rights oo waxaa weeye xuquuqda daruuriga ah ee siiya codka dhibnaaha nidaamka cadaalada danbi dhaxdeeda. Bayaanada saamaynta dhibanaha waxay siiyaan dhibanayaasha fursad ay kula wadaagaan maxkamada iyo eedeysanaha, iyada oo hadalkooda isticmaalaya, sida uu danbigu u saameeyay.

**Sida loo diyaariyo bayaanka saamaynta dhibanaha?**

Ruux kasta oo keena mushkilad jidh ama dareen, oo waxyeeleeyay hanti ama dhaqaale waayitaan, taas oo soot uga timid danbiga lagula kacay. Guud ahaan, Bayaanada Saamaynta Dhibanaha waxaa diyaarin kara:

- Dhibanayaasha tooska ah (shakhsiyaad, hay'ado, iyo ganacsiyo)
- Cida ka badbaaday dhibanaha dhintay
- Xubnaha qoyska dhibayaasha
- Saaxiib dhaw iyo xubno bulsho oo uu saameeyay saamaynta labaad ee danbiga ayaa sidoo kale soo gudbin kara bayaanka kiisaska qaar.

Maxkamadaha ayaa xadidi kara tirada dhibayaasha ee hadalka jeedin kara wakhtiga xukunka, guud ahaan ma jirto wax xadidaad ah ee tirada bayaanada qoran ee maxkamadu eegeyso.

**Ma in aan qoraal Bayaanka Saamaynta Dhibanaha?**

Maya. Khasab maaha in aad qorto bayaanka saamaynta dhibanaha. Adiga ayaa gabi ahaanba iska leh ka qayb galka ikhtiyaarkeeda. Faa'idooyinka qaar ee Bayaanka Saamaynta Dhibanaha ee Qoran waa:

- Xaakin ayaa toos kuu dhagaysan kara, adiga oo isticmaalaya kalmadahaaga. Waxay siin kartaa xaakinka aragti inay jiraan ah nolol, dhibane, qoys, bulsho dhab ah oo toos uu u saameeyay danbigani.
- Waxa aad fursad u heli doontaa inaad si toos ah ugu sheegto xaakinka fikirkaaga mudada xukunka ee aad ku talinayso.
- Bayaanka ayaa qayb ka noqonaya duwaanka kiiska.
- Dhibanayaasha qaar waxay sheegey in helitaanka fursadahan lagula wadaagayo maxkamada, iyo eedeysanaha, ee saamaynta danbigu ay qayb laxaad la' ka tahay safarka bogsasho ee shakhsiga.

**Sida loo diyaariyo Bayaanka Saamaynta Dhibanaha**

Siyaarinta bayaanka saamaynta dhibanaha waxaa weeye shay adiga kuu gaar ah oo shaqo wax ku ool ah noqonaysa. Shakhsiyaadka ama hay'adaha qaar waxay ku sheegaan dhibaatada ay kala kulmeen oo ay ku sheegaan kalmado ay ku muujinayaan jahwareerka badan ama saamaynta ay kala kulmeen danbiga. Xasuuso adiga ayaa iska leh, naso, oo iska caabi cadaadiska ku odhanaya waa inay noqoto "waxa ugu wanaagsan". Hoos waxaa ku yaala su'aalaha kugu hagaya oo kaa caawinaya:

- Sidee ayuu danbi aniga, ganacsigayga ama qoyskayga u saameeyay?
    - *Jidh ahaan* - tusaale ahaan: dhaawacyo, qaliino, qayb jidhka oo go'day, laxaad la'aan mudo dheer ah, korodh kacsanaanta wadnaha ah ama damqasho mudo dheer, daal, warwar, iwm.
    - *Dareen/cilmi nafsi* - tusaale ahaan: Isku buuq, astaamaha saska, PTSD, Awood beelid u fiirsasho wax, xishood, danbiile, argagax, sas, baqdin, Xanaaq, ama kacsanaan, muruqo, iwm.
    - *Dhaqaale* - tusaale ahaan: Kharashka Caafimaadka (joogitaanka isbitaalka, gaadiidka xaalada degdega ah, bukaan jiif ama bukaan socod, agabka caafimaadka) dawada la qoro, waayitaanka shaqada ama shaqo ka tegitaanka, dib tobobar ugu gelisa shaqo, kharashka nadiifinta meesha dambigu ka dhacay, kharashka meel kale u guurid, daryeelka ilmaha, waayitaanka ama waxyeelo hanti shakhsi ahaaneed, waayitaanka dakhli, kharashka caafimaadka maskaxda, iwm.
    - *Saamaynta balaadhan* - tusaale ahaan: Isbedelka aragtida caalamka, samaaynta ruuxiyan, saamaynta bulshada, iwm.
- Waa maxay talooyinkaaga ku saabsan maxkamada ee ku saabsan xukunka kiiskan?
    - Sidee ayaad ku talinaysaa in daawayntan ay noqoto?
    - Ma jirtaa mudo wakhti oo aad ku talinayso in xukunku noqdo?

Xasuuso in kuwani kaliya yihiin tilmaamo kaa caawinaya inaad eegto qaababka kala duwan ee dambigan kuu saameeyay. Tani waxaa weeye fursad aad ugu sharaxayso maxkamada kalmadahaaga adiga oo isticmaalaya waxa aad la kulantay.

**Sidee ayuu Bayaanka Dhibanaha Danbiga loogu soo bandhigaa maxkamada?**

Diyaarinta iyo bandhiga bayaanka saamaynta dhibanaha maxkamada horteedu waa mid shakhsi ahaaneed. Shakhsiyaadka qaar ayaa sheega inayna jeclayn inay ka hor hadlaan maxkamada iskaba daa eedeysanahee. Waxaa jira ikhtiyaaro kala duwan oo loogu soo bandhigi karo maxkamada bayaanka saamaynta dhibanaha. Ikhtiyaarada qaar waxaa kamid ah:

- Weedha afka ee maxkamada furan ee sida tooska ah loola hadlayo xaakinka.
    - Waxa aad dooran kartaa in aad hesho taageero shakhsi ahaaneed ama u loleeye ku garab istaaga makra aad bayaanka jeedinayso
    - Waxaad dooran kartaa inaad qabato sawir (wayn oo maxkamadu wada arki karto) si aad u muujiso saamayntaada.
- Doorashada ruux ku taageera ama kuu akhriya bayaanka oo adiga ku matalaya.
- U gudbinta warqada xaakinka (iyo eedeysanaha) si uu u akhriyo kahor xukunka.
    - Waxaa muhiim ah in la ogaado in wixii bayaan ah ee qoraal ah ay u furan tahay shacabka oo uu marin toos au i siiyo eedeysanaha iyo cida dacwada lagu soo oogay. Fadlan *haku* darin cinwaanka ama macluumaadka xidhiidhka bayaankaaga.
    - Dhibanayaasha qaar ayaa doona inay ku daraan bayaanka qoraalka ah marka laga tago bayaanka afka ee ay jeediyaan inta ay maxkamadu socotay. Hadii aad doorato ikhtiyaarkan, fadlan ha gudbin bayaan isku mid ah, Xaakinka ayaa hore u akhriyay wixii bayaan qoran ah kahor dhagaysiga xukunka.
- Waxa aad sidoo kale dooran kartaa in aad hore usii duubto bayaankaaga isaga oo fiidyaw ah adiga oo ogolaanshe ka helaya maxkamada. La xidhiidh u ololeeyayaasha marka hore hadii aaad doonayso inaad ikhtiyaarkan samayso si aad uga hesho ogolaanshe maxkamada.